Sheeg immissa waraaqood oo difaacid ah ayaa horay u jiray oo Dacweysanaha lagu amray in uu ka fogaado adiga ama qof kale oo kuu qoran #3 (waxaad ku jawaabi karto *eber*, *hal*, ama *laba ama wax ka badan*). Haddii ay horay u jirtay wax ah waraaqo amarro ah, noo qor lambarka feylka (haddii aad garaneyso) iyo meesha amarkaas laga bixiyey (deegaan/gobol).
- b. Does the Respondent have a *current* HRO or OFP (Order for Protection) against you? If so, give the court file number if you know it.
Miyuu Dacweysanuhu haystaa *hadda* HRO ama OFP (Amar ah Difaacid) oo adiga kaa dhan ah? Haddii ay haa tiri, maxkamadda u qor lambarka feylka haddii aad garaneyso.
7. If there are any court cases about child custody or parenting time involving both you and the Respondent, give the court file number and location of the case.
Haddii ay jirto wax ah kiisas maxkamadeed oo ku saabsan haysashada carruurta ama wakhtiga waalidnimada oo idiin dhaxeeya adiga iyo Dacweysanaha, maxkamadda u qor lambarka feylka iyo goobta kiiska.

ACTS OF HARASSMENT/FICILLADA AH DHIBAATEYNTA

8. This question asks you to describe how the Respondent has harassed you and anyone you listed at #3. Check all of the boxes that apply (a-p), and give the date (or date range) and details of the harassment.
Su'aashan waxa ay ku saabsan tahay Dacweysanaha si uu kuu dhibay adiga ama qof kale oo ku qoran #3.
Calaamadi gebi ahaan santuuqyada ku khuseeya (a-p), oo qor taariikhda (ama xilligii tariikhda) iyo faahfaahinta dhibaateynta.

If you need more space, add paper.

Haddii aad u baahato qoraal dheeraad ah, soo raaci waraaq.

It may be helpful to look at the definitions of harassment found at the beginning of these instructions, and online at Minn. Stat. § 609.748, subd. 1 (<https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/609.748>).

Waxaa ku caawin kara qeexidda dhibaateynta ee ku qoran bilowga habraacyadan, iyo internetka Minn. Stat. § 609.748 farqadda 1. (<https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/609.748>).

9

9. Describe the effect the harassment has upon the victim’s safety, security or privacy:
Faahfaahi saameynta dhibaateynta ay ku yeelatay dhibbanaha badqabkiisa, ammaanka ama xuquuqda shakhsiga ah:

10

10. Do you believe the harassment will continue?
Ma rumeysan tahay in ay dhibaateyntu sii soconeyso? Yes/ Haa No/ Maya Why/ Sabab?

9. What effect has Respondent’s behavior had on your safety, security, or privacy? If you listed anyone in #3, include the effect of Respondent’s actions on their safety, security, or privacy. Maxay tahay saameynta habdhaqanka Dacweysanaha uu ku leeyahay badqabiddaada, amnigaaga iyo xuquuqdaada shaqhsiga ah? Haddii aad qof kale ku qortay #3, sida saameynta ficillada Dacweysanaha ee ah sida badqabiddaada, amnigaaga iyo xuquuqdaada shaqhsiga ah.
10. Let the court know whether you think the harassment will continue (and why you think this). Maxkamadda u sheeg haddii aad u maleyneyso in ay dhibaatadu kugu sii soconeyso (iyo sababta aad sidaas ugu maleyneyso).

11

11. I ask the Court to issue a HRO as follows:
Waxaan ka codsanayaa Maxkamaddu in ay HRO u bixiso sida soo socoto:

a. Respondent shall not harass/ Dacweysanaha waa inuusan dhibaato ii geysan:

- me/ aniga
- minor children for whom I am the parent, legal guardian, or stepparent
ilma aan u ahay waalid, masuul sharciyeysan, ama waalid labaad
- an adult ward for whom I am the legal guardian
qof weyn oo aan masuul ka ahayn

11. In #11, you are asking the court for specific details to be included in the HRO. Qeybta #11, waa inaad maxkamadda uga codsato faahfaahin gaar ah oo lagu qorayo HRO.
- In section “a,” you are checking the boxes to show who the court should order Respondent not to harass.
Qeybta ka hooseysa ee “a,” waa inaad calaamadiso santuuqyada aad ku qoreyso Dacweysanaha ay maxkamaddu ku amreyso in uu dhibka kaa daayo.
 - In section “b,” check the box or boxes to show who the Respondent should have no contact with.
Qeybta ka hooseysa ee “b,” waa inaad calaamadiso santuuqyada aad ku qoreyso Dacweysanaha aan kula soo xiriiri karin.
 - Section “c” asks whether you want the Respondent to stay away from your home (or a protected person’s home). You can also ask the court to order the respondent to stay away from a reasonable area surrounding the home (you should describe what you mean). You can also list exceptions. For example, if it is okay for the Respondent to park at the curb in front of your home to exchange the children for

parenting time, you can write that in the “except as follows” section.

Qeybta ka hooseysa ee “c” waa haddii aad rabto Dacweynsanuhu in uu ka fogaado gurigaaga (ama guriga qof kale oo la difaacayo). Waxa kale oo aad ku soo codsan kartaa in dacweysanaha lagu amro in loo diido dhul macquul ah oo ku dhow guriga (waxaa khasab ah inaad faahfaahiso macnaha aad ula jeeddo). Waxa kale oo aad qori kartaa waxyaabaha laga reebayo. Tusaale ahaan, haddii ay caadi tahay in Dacweynsanuhu baabuur dhigan karo jidka guriga u dhow si uu ilmaha uga kaxeysto wakhtigiisa, waxaad ugu qori kartaa “marka laga reebo waxa soo socda” qeybtan.

Section “d” asks whether you want the Respondent to stay away from a place of employment. Qeybta ka hooseysa ee “d” waa haddii aad rabto Dacweynsanuhu in uu ka fogaado goob shaqo.

COURT HEARING/ DACWAD-DHAGEYSIGA MAXKAMADDA



Important Notices about a Hearing/ Ogeysiisyo Muhiim u ah Dacwad-dhageysiga:

- You have a right to request a court hearing. **Respondent will be served a copy of this Petition if there is a hearing.**
Waxaad xaq u leedahay dacwad-dhageysi. **Dacweysanaha waxaa loo gudbinayaa koobbiga Dacwada haddii uu jiro dacwad-dhageysi.**
- If the judicial officer dismisses your case because it has no merit, no hearing will be held. Haddii uu garsoore u tuuro kiiskaaga oo inuusan ahayn dacwad la qaadi karo, ma la sameynayo dacwad-dhageysi.
- The judicial officer can issue a HRO *without* a court hearing if the judicial officer finds there is immediate and present danger of harassment.
Garsooruhu wuxuu soo saari karaa HRO *iyadoon la sameyn* dacwad-dhageysi maxkamadeed haddii garsooruhu ogaado in ay jirto khatar taagan oo ah dhibaateyn.
- If the judicial officer issues a HRO without a hearing, the Respondent can request a hearing within 20 days of the date the Petition is served. If Respondent requests a hearing, the court will notify you by mail at least five days before the hearing date.
Haddii uu garsooruhu soo saaro HRO iyadoon la sameyn dacwad-dhageysi, Dacweynsanuhu wuxuu ilaa 20 cisho ku soo codsan karaa dacwad-dhageysi taariikhda Dacwada loo gudbiyo. Haddii Dacweynsanuhu codsado dacwad-dhageysi, maxkamadda ayaa kugu soo ogeysiin doonta boostada ugu yaraan shan cisho ka hor taariikhda dacwad-dhageysiga.
- If there is a hearing, you must attend the hearing and prove that the statements in your Petition are true, and that Respondent’s actions are harassment, as defined by Minnesota law.
Haddii ay jirto dacwad-dhageysi, waa khasab in aad timaaddo oo aad caddeyso in waxa ku qoran Dacwadaadu yihiin wax run ah, iyo in ficillada Dacweysanaha ay yihiin dhibaateyn, sida ku qeexan sharciga Minnesota.

12. Choose a. or b/ Calaamadi a. or b.

12a

- a. I am not requesting a court hearing at this time. But if the court denies my request for a HRO because the court finds there is no immediate and present danger of harassment, then/ Wakhtiga xaadirka ah ma codsanayo dacwad-dhageysi. Laakiin haddii ay maxkamaddu diiddo codsigeyga ah HRO sababtoo ah maxkamaddu ma aragto wax khatar degdeg hadda jira oo ah dhibaateyn. dabadeedna

I want/ Waan rabaa

I don't want a court hearing/ Ma rabo dacwad-dhageysi maxkamadeed.

OR/ AMA

12b

- b. I am requesting a court hearing/
Wakhtiga xaadirka ah waxaan codsanayaa dacwad-dhageysi.

12. Do you want to ask for a hearing/Ma rabtaa in aad codsato dacwad-dhageysi?

- a. Check “a” if you are not asking for a hearing *now*. And do you want a hearing if the court denies your request for a restraining order because the judicial officer did not find an immediate and present danger of harassment?

Calaamadi “a” haddii aad codsaneyso dacwad-dhageysi *hadda*. Haddana ma codsaneyso dacwad-dhageysi haddii maxkamaddu diiddo codsigaaga ah amarka difaacidda ah sababtoo ah garsooraha ayaa heli waayey in ay jirto khatar taagan oo ah dhibaateyn?

- b. Check “b” if you are asking for a court hearing.
Calaamadi “b” haddii aad codsaneyso dacwad-dhageysi.

13. How long do you want the HRO to last? You have three options in #13:

Muddo intee e'eg ayaad rabtaa inay jirto waraaqda HRO? Waxaad saddex hab ku kala dooran kartaa qeybta #13:

- Until a specific date (the date must be less than 2 years from the date you fill out the petition); Ilaa wakhti gaar ah (taariikhdu waa in ay ka yar tahay 2 sano laga soo bilaabo maalinta aad buuxiso dacwada);

- 2 years; or/ 2 sano; ama

- Up to 50 years (note: a court can grant a Harassment Restraining Order for up to 50 years *if* you have had 2 or more restraining orders against Respondent, or if Respondent has violated a restraining order between you at least twice).

Ilaa iyo 50 sano (ogow: maxkamad ayaa bixin karta Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda oo gaaraya 50 sano *haddii* aad Dacweysanaha ka qaadata 2 jeer ama in ka badan oo ah amarka ammaangelinta ama joojinta dhibidda, ama haddii Dacweysanuhu ku xadgudbay amar ahaa ammaangelinta ama joojinta dhibidda oo idiin dhaxeeyey labadiina ugu yaraan laba jeer).

There will likely be a hearing scheduled if you ask for a restraining order to last more than 2 years. Waxay u badan tahay in lagu qaban doono ballan ah dacwad-dhageysi haddii aad soo codsato in waraaqda ammaangelinta ay gaarto 2 sano.

SIGNATURE BLOCK/MEELAHA SAXIIXA

I declare under penalty of perjury that everything I have stated in this document is true and correct. Minn. Stat. § 358.116. Waxaan sharciga ciqaabta dhaarta beenta ah ku caddeynayaa wax kasta oo aan ku sheegay waraaqdan in ay yihiin run iyo sax. Sharciga Minn. Stat. § 358.116.	
Dated/ Taariikhda: _____	Signature _____
_____	Name/ Magaca _____
County and state where signed _____	(If you have asked to keep your address and/or phone number confidential, do not include it here.)
Degmada iyo gobolka lagu saxiixay _____	(Haddii aad soo codsatay in cinwaanka iyo/ama lambarka taleefanka lagaaga dhigo qarsoodi, ha ku qorin halkan.)
	Address/ Cinwaanka: _____
	City/State/Zip _____
	Magaalada/Gobolka/Lambarka Boostada _____
	Xaafadda (Zip): _____
	Telephone/ Taleefanka _____
	E-mail address: _____
	Cinwaanka boostada internetka (email): _____

- A. Sign your name under penalty of perjury. Then print your name on the line under your signature.
Ku saxiix magacaaga iyo ciqaabta dhaarta beenta ah. Dabadeedna far waaweyn ku qor magacaaga leynka saxiixa ka hooseeya.

By signing your name under penalty of perjury, you are stating that the information in the document is true to the best of your knowledge. If you know something in the form is not true when you sign it, you could be found guilty of the crime of perjury (see Minn. Stat. § 609.48, <https://www.revisor.mn.gov/statutes/?id=609.48>).

Markaad magacaaga ku saxiixdo ciqaabta dhaarta beenta ah, waxaad sheeganeysa waa in macluumaadka waraaqda ku qoran yihiin kuwa run ah sidaad u ogtahay. Haddii aad ogtahay wax foomkan ku qoran oo aan run ahayn markaad saxiixdo, waxaa ku qabanaya faldanbiyeed ah sharciga dhaarta beenta ah (eeg Minn. Stat. § 609.48, farq. 1: <https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/609.48>).

- B. Fill in the date you signed the form/ Qor taariikhda aad foomka saxiixday.
- C. Fill in the county and state you were in when you signed the form.
Ku qor degmada iyo gobolka aad joogtay markaad waraaqda saxiixday.
- D. This section is for your address, telephone number, and email address. **However, if you are asking the court to keep your address and/or telephone number confidential, do not include the information here.** Instead, fill out and file the *Petitioner's Request to Keep Address/Phone Confidential* (HAR104).

Qeybtan waa cinwaanka, lambarka taleefanka, iyo cinwaanka boostada internetka (email). **Hase yeeshee haddii aad maxkamadda ka codsaneyso in lagu qariyo cinwaankaaga iyo/ama taleefankaaga, macluumaadkaas ha ku darin halkan.** Balse waa inaad soo buuxiso oo soo gudbisoo foomka *Codsiga Dacwoodaha loogu Qarinayo Cinwaanka/Taleefanka* (HAR104).

Step 3/ Tallaabada 3-aad

Fill Out the *Law Enforcement Information Sheet - Harassment* (HAR103)

Ku qor *Waraaqda Macluumaadka Ciidanka Booliiska – Dhibidda Dadka* (HAR103)

The *Law Enforcement Information Sheet - Harassment* (HAR103) is found online at <http://www.mncourts.gov/mncourtsgov/media/CourtForms/HAR103.pdf?ext=.pdf>. This form will help law enforcement find the respondent to personally serve the HRO. Fill in as much information as possible.

Waraaqda *Macluumaadka Ciidanka Booliiska - Dhibaateynta* (HAR103) waxaa laga heli karaa internetka <http://www.mncourts.gov/mncourtsgov/media/CourtForms/HAR103.pdf?ext=.pdf>. Foomkan wuxuu booliska ku caawinayaa helidda dacweysanaha si ay ugu geeyaan waraaqda HRO. Ku buuxi macluumaadka ugu badan ee aad hayso.

Step 4/ Tallaabada 4-aad

Fill Out the *Petitioner's Request to Keep Address/Phone Confidential* (HAR104)

Ku Qor *Codsiga Dacwoodaha loogu Qarinayo Cinwaanka/Taleefanka* (HAR104)

(only if you are asking that your address and/or phone number be kept confidential)

(keliya haddii aad rabto in lagu qariyo cinwaanka iyo/ama lambarka taleefanka)

Whatever information you give to the court will become public information as soon as the court receives notice that the Respondent has been served with the HRO.

Macluumaad kasta oo maxkamadda loo sheego waxay noqon doonaan macluumaad dadweynuhu arki karaan isla marka ay maxkamaddu ogaato in Dacweysanaha la gaarsiiyey waraaqada HRO.

If the Respondent does not know your address and/or telephone number, and you do not want the Respondent to know this information, you may file a *Petitioner's Request to Keep Address/Phone Confidential* (HAR104) to ask the court to keep your address and/or telephone number confidential in this case. HAR104 is found online at

http://www.mncourts.gov/mncourtsgov/media/CourtForms/HAR104_1.pdf?ext=.pdf.

Haddii Dacweysanaha uusan ogeyn cinwaanka dacwoodaha iyo/ama lambarka taleefanka, oo uu weliba rabo in looga qariyo macluumaadkaas shakhsiga ah, waa in uu soo gudbiyo *Codsi Dacwoode oo ah Qarinta Cinwaanka/Taleefanka* (HAR104) si maxkamadda looga codsado inay markan u qariso cinwaanka iyo/ama lambarka taleefanka. HAR104 waxaa laga heli karaa internetka http://www.mncourts.gov/mncourtsgov/media/CourtForms/HAR104_1.pdf?ext=.pdf.

Please note that if you choose to keep your address confidential, your address will not be listed on the Harassment Restraining Order, and it may be more difficult to enforce the order for any violations occurring at or near your address.

Fadlan ogow haddii aad rabto in lagu qariyo cinwaankaaga, laguma qorayo Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda, laakiin waxaa ku adkaaneysa fulinta amarka marka lagugu soo xadgudbo adiga ama meel gurigaaga u dhow.

Step 5/ Tallaabada 5-aad

File Completed Forms with Court Administration U Gudbi Foomamka Buuxsan Maamulka Maxkamadda

File the following forms with court administration:

Foomamka soo socda waa in loo soo gudbiyo maamulka maxkamadda:

- *Petition for Harassment Restraining Order* (HAR102)
Foomka Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda (HAR102)
- *Law Enforcement Information Sheet – Harassment* (HAR103)
Waraaqda Macluumaadka Ciidanka Booliiska – Dhibidda Dadka (HAR103)
- *Petitioner's Request to Keep Address/Phone Confidential* (HAR104) –if you want the court to keep your address and/or phone number confidential.
Codsiga Dacwoodaha ee Qarinta Cinwaanka/Taleefanka (HAR104) –haddii aad rabto in ay maxkamaddu kuu qariso cinwaanka iyo/ama lamabarka taleefanka.

You can file the forms in the following ways/

Waxaa foomamka u soo gudbin kartaa siyaabaha soo socda:

- In person at the courthouse/ Inaad toos u keento maxkamadda;
- By mail; or/ Inaad boostada ku soo dirto; ama
- Electronically through the eFS System/ Inaad ku soo dirto internetka habka eFS System.
 - NOTE: once a party files electronically, they are required to use the eFS System throughout the entire case; this means they cannot go back to paper filing in that case).
OGOW: haddii qof uu internetka ku soo diro foomamka, qofkaasi waxaa khasab ku ah in uu isticmaalo eFS System mar kasta inta uu kiiska socdo; taas macnaheedu waa in uusan dib ugu noqon waraaq inuu isticmaalo).
 - For more information about electronic filing and the eFS System, see www.mncourts.gov/efile.
Wixii macluumaad dheeraad ah iyo in waraaqaha lagu soo diro habka eFS System, ka eego www.mncourts.gov/efile.

Step 6/ Tallaabada 6-aad

After You File.../ Ka dib markaad soo gudbisoo...

Once all of your forms are filed, a judicial officer will make a decision about your requests and issue an order. When the order is ready, you will get a copy of the order.

Marka la soo gudbiyo foomamka, qof garsoore ah ayaa go'aan ka gaaraya codsiga si uu amar uga saaro. Marka la diyaariyo amarka la gaaray, waxaa lagu soo dirayaa koobbiga amarka.

Read your order carefully. Did the judicial officer:

Si taxaddar leh u akhriso amarkaas. Miyuu qofka garsooraha ah:

- **Grant** an order without a hearing (called an Ex Parte Order)?
Kuu oggolaaday amar iyadoon la sameyn dacwad-dhageysi (nooc la yiraahdo Ex Parte Order ama Go'aan Hal Dhinac ah)?
- Deny an Ex Parte Order but schedule a **hearing** to hear more information from you?
Kuu diiday Go'aan Hal Dhinac ah oo kuu qabtay ballan ah **dacwad-dhageysi** si aad u dhageysato macluumaad dheeraad ah oo adiga kugu saabsan?
- Deny an Ex Parte Order and **dismiss** the case?
Kuu diiday Go'aan Hal Dhinac ah oo **ka talabaxay** kiiska?

If the judicial officer **GRANTS** the Ex Parte Order, it will be effective immediately. The judicial officer may have also ordered a hearing. If the judicial officer did not order a hearing, the Respondent has the right to request a hearing within 20 days of service of the petition and Ex Parte Order.

Haddii qof garsoore ah **KUU OGGOLAADO** Go'aan Hal Dhinac ah, isla markiiba waa uu dhaqan gelayaa. Garsooruhu waxa uu amri karaa dacwad-dhageysi. Haddii uusan garsuuruhu amrin dacwad-dhageysi, Dacweysanuhu waxa uu xaq u leeyahay inuu dacwad-dhageysi ku codsado 20 maalmood gudahood marka la soo gaarsiyo codsiga ah Go'aanka Halka Dhinac ah.

If a hearing is ordered, the Harassment Restraining Order (HRO) will be in effect until the date of the hearing. Depending on what happens at the hearing, the HRO may or may not continue. You must attend the hearing if you want the court to issue a harassment restraining order.

Haddii la amro dacwad-dhageysi, Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda (HRO) ayaa dhaqan galaya ilaa taariikhda dacwad-dhageysi. Waxay ku xiran tahay dacwad-dhageysiga, waraaqda HRO waa la sii wadi karaa ama waa la joojin karaa. Waa in aad timaaddo dacwad-dhageysiga haddii aad maxkamadda ka rabto in lagu siiyo waraaqda amarka ammaangelinta ama joojinta dhibidda.

If the judicial officer **DENIES** the request for the Ex Parte Order **and** you have asked for a hearing, then court administration will schedule a hearing. The court will send a notice of the date and time of the hearing to you and to Respondent. There will be no HRO in effect before the hearing. You **must** attend the hearing. If you do not attend the hearing, the HRO may be dismissed.

Haddii uu qofka garsooraha ah **KUU DIIDO** codsiga Go'aanka Halka Dhinac **oo** aad codsatay dacwad-dhageysi, markaas maamulka maxkamadda ayaa kuu dhigaya ballanta dacwad-dhageysi.

Maxkamadda ayaa adiga iyo Dacweysanaha boostada idiinku soo direysaa ogeysiiska taariikhda dacwad-dhageysi. Ma jireyso waraaq ah HRO oo shaqeyneysa dacwad-dhageysiga ka hor. Waa **khasab** inaad timaaddo dacwad-dhageysiga. Haddii aad imaan weydo dacwad-dhageysiga, HRO lama tixgelinayo.

If the judicial officer **DENIES** the request for the Ex Parte Order **and** you have NOT asked for hearing, then no hearing will be scheduled, and your case is dismissed.

Haddii uu qofka garsooraha ah **KUU DIIDO** codsiga Go'aanka Halka Dhinac **oo** AADAN codsan dacwad-dhageysi, markaas lama qabanayo ballan ah dacwad-dhageysi.

If the judicial officer **DISMISSES** the case and does not schedule a hearing even if you asked for one, this means that the judicial officer does not believe that what you described in your petition fits the definition of harassment, or may not have enough information to make a decision. You may get legal advice to see what your options might be.

Haddii uu qofka garsooraha ah uu **TIXGELIN WAAYO** kiiska oo aan lagu sameyn ballan ah dacwad-dhageysi, taas macnaheedu waa in uusan garsooruhu aaminsaneyn dhibaataada aad codsigaaga ku qortay, ama waxaa dhici karta inay ka maqan tahay macluumaad go'aan lagu gaari karo. Waxaad raadsan kartaa talo sharci ah si aad u fahamto waxyaabaha aad sameyn karto.

A copy of any order (except dismissed HROs) must be served on the Respondent. If your petition gave an address in Minnesota where the Respondent can be served, court administration will send the documents to the Sheriff who will try to personally serve the Respondent. There is no fee for this service.

Koobbiga amar kasta (marka la tixgeln waayo waraaqaha HRO maahee) waxaa khasab ah in loo geeyo Dacweysanaha. Haddii cinwaanka ku qoran codsiga uu yahay Minnesota iyo mid loogu geyn karo Dacweysanaha, maamulka maxkamadda ayaa waraaqaha u diraya Shariifka oo si shakhsi ah ugu geynaya Dacweysanaha. Adeeggan wax lacag ah la iskama rabo.

If Respondent is under 18 years old and you gave the court the name and address of the parent or legal guardian, the court will mail a copy of the order to Respondent's parent or legal guardian. Haddii uu Dacweysanuhu ka yar yahay 18 jir oo aad Maxkamadda siiso magac iyo cinwaan waalid ama masuul sharciyeysan, maxkamadda ayaa koobbiga amaraka u direysa waalidka ama masuulka Dacweysanaha.

Service is complete when law enforcement personally delivers a copy of the papers to Respondent. It may take them several tries to serve the Respondent, which could take a week or more.

Hawshaas waxay soo dhammaaneysaa marka waraaqaha koobbigooda si shakhsi ah loogu geeyo Dacweysanaha. Dhawr jeer ayaa la isku dayi karaa in Dacweysanaha loo geeyo, taasoo qaadan karta toddobaad ama in ka badan.

If law enforcement is not able to serve Respondent you may file the *Affidavit and Request for Publication (Harassment) (HAR701)*. This form is used to ask the court to publish information about the order as a way to serve the Respondent.

Haddii uu boolisku Dacweysanaha u gudbin waayo, waxaad soo gudbisan kartaa *Markhaatikicid Qoran iyo Codsiga Daabacan (Dhibaateynta) (HAR701)*. Foormkan waxaa maxkamadda looga codsadaa in ay daabacaan macluumaad ku saabsan amarka si loogu gudbiyo Dacweysanaha.

HAR701 is available online at <http://www.mncourts.gov/GetForms.aspx?c=22&f=354>.

HAR701 waxaa laga heli karaa internetka <http://www.mncourts.gov/GetForms.aspx?c=22&f=354>.

Step 7/ Tallaabada 7-aad

Other HRO Forms/ Foomamka kale ee HRO

Other HRO-related forms are available online starting at:

Foomamka kale ee la xiriira HRO waxaa laga heli karaa internetka oo waa in laga bilaabo:

<http://www.mncourts.gov/GetForms.aspx?c=22>.

- *Petitioner's Request for Dismissal of Harassment Restraining Order* (HAR401) – used to ask the court to dismiss the HRO
Dacwoodaha loo Tixgelin Waayo Dacwadda Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda ah (HAR401) – ee loo isticmaalay maxkamaddu in ay tixgelin weydo HRO
- *Affidavit and Order to Show Cause for Contempt* (HAR501) – used to let the court know that the respondent has violated the HRO
Markhaatikacid iyo Amarka Muujinaya Sababta Ixtiraam La'aan (HAR501) – waxaa maxkamadda looga sheegaa in dacweysanuhu jebiyey amarkii HRO
- *Notice of Motion and Motion to Change Harassment Restraining Order* (HAR601) – used to ask for a change (modification) of the HRO
Ogeysiis Mooshin iyo Mooshin Lagu Beddelayo Amarka Ammaangelinta ama Joojinta Dhibidda (HAR601) – waxaa maxkamadda looga codsanayaa in la beddelo (beddelaadda) HRO
- *Affidavit and Request for Publication* (HAR701) – used to ask the court to publish the HRO if personal service is unsuccessful
Maragfuridda iyo Codsiga Daabacaadda (HAR701) – waxaa maxkamadda looga codsanayaa daabacaadda HRO haddii qofka loo gudbin waayo waraaqaha